## 6. MAXAAD SAMAYN KARTAA HADDII AAD UGA SOO CARARTAY WADDANKAAGI HOOYO IN NOLOSHAADA AY KU JIRTAY KHATAR?

- Haddii aad uga soo tagtay dalkaaga dagaal ama khilaafka dad hubaysan awgood, ama sababtoo ah waxaa laguu waxyeeleeyay sabab la xiriirta qoladaada, diintaada, dhalashaada, inaad xubin ka tahay koox bulsho ah ama qowmiyad gaar ah, ra'yigaaga siyaasadeed, ama cida aad la galmooto; Haddii aad qabtid cabsi macqul ah oo sal leh in noloshaadu ay khatar ku jirto ama aad la kulmi doonto dhibaato halis ah haddii aad ku laabato dalkaagi, waxaad xaq u leedahay inaad codsato magangalyo caalami ah.
- Waxaad xaq u leedahay inaad ku codsato caawimo luqadaada si aad u sheegto sheekadaada oo aad u sharaxdo sababta aad uga soo tagtay wadankaaga. Waxaad magangelyo caalami ah ka codsan kartaa mas'uuliyiinta dawladda markaad timaaddo Talyaaniga ama ka dib markii laguu wareejiyo xarunta soo dhaweynta. Maamulka ayaa markaa dhageysan doona xaaladaada gaarka ah waxayna qiimeyn doonaan baahidaada magangalyada caalamiga ah.
- Haddii aad Talyaaniga la timaadeen qoyskaagii (hooyadaa, aabbahaa, walaalkaa iyo/ama walaashaa) sababta aad u soo cararteena ay tahay in xubin qoyskaaga ka mid ah lagu dhibaateeyay sababaha adigana lagugu soo dhibaateeyay, waxaad xaq u leedahay inaad codsato magangelyo caalami ah.

## 7. MAXAAD SAMEYN KARTAA HADDII XUBIN QOYSKAAGA KA MID AH UU KU NOOL YAHAY TALYAANIGA AMA YURUB?

- Haddii mid ka mid ah qaraabadaada, oo ay ku jiraan midkood ama labadaada waalid, walaalkaa ama walaashaa, adeerkaa ama abtigaa, uu ku nool yahay Talyaaniga ama Yurub, waxaad xaq u leedahay inaad la noolaato haddii aad rabto iyo haddii ay dani kuugu jirto: waxaa jira nidaam sharci ah oo si badbaado leh aad dib ugula midoobi karto, adigoon wax lacag ah bixin iyo adoon ku tiirsanaanin dadka khatarta ku gelin kara inaad sidaas sameyso.
- Haddii aad xiisaynayso habraaca dib u mideynta qoyska, la socodsii xarunta soo-dhowaynta iyo masuulkaaga. Waxay awoodi doonaan inay kuu sharaxaan sida ay u shaqeyso.
- Habraaca dib u midaynta qoyska waxa ay qaadanaysaa wakhti ay masuuliyiinta dawladu dhagaystaan rabitaankaaga oo ay hubiyaan curaarta qoyska si ay u ogaadaan in qaraabadaada ay si badbaado leh kuu daryeeli karaan: haddii ay haystaan guri, aqoonsi iyo shaqo.
- Waxaad ku biiri kartaa xubin qoyskaaga ah oo joogta waddan kale oo Yurub ah xitaa haddii aad warqadahaaga ku samaysatay Talyaaniga ama aad hore uga codsatay magangalyada caalamiga ah gudaha Talyaaniga.
- Haddii aad xubin qoys ku leedahay Talyaaniga ama Yurub, waxaad sidoo kale go'aansan kartaa inaadan la noolaan iyaga laakiin aad raacdo habraaca soo dhaweynta adigoo ilaalinaya inaad xiriir la lahaato iyaga.

## DA'YARTA IYO XUQUUQDOODA



- MASLAXADDA UGU WANAAGSAN EE ILMAHA AMA DA'YARTA
- NOLOL IYO CAFIMAAD
- KA QAYB QAADASHADA, DHEGEYSIGA IYO MACLUUMAADKA
- MIDNIMADA QOYSKA
- SKOOLKA
- BARASHADA SHAQADA
- CIYARTA
- SHARCIGA DEGANAASHADA
- XARUUNTA SOO DHAWEYNTA



### HADDII AAD U BAAHAN TAHAY IN LAGUGU SIIYO MACLUUMAAD AMA CAAWIMO LUQADAADA WAXAAD LA XIDHIIDHI KARTAA KHADKA AY DADKA KA CAAWISO SAVE THE CHILDREN

- Khadka dadka laga caawiyo waa lambar lacag la'aan ah oo aad wici karto haddii aad dhibaato qabto oo aad u baahan tahay taageero ama macluumaad.
- Waxaad codsan kartaa inaad ku hadasho luqadaada.
- Waxaad wici kartaa Isniinta ilaa Jimcaha laga bilaabo 10 a.m. ilaa iyo 5 p.m

**+39 800 14 10 16**

Save the Children

SO

# OGOW XUQUUQDAADA

Save the Children






## 11. QAAMUUS

- **Xarunta soo dhaweynta** waa magaca goobta aad ku nooshahay. Waxay noqon kartaa mid ku meel gaar ah ama mid waligeed ah, tusaale ahaan guriga aad ku noolaan doonto kana bilaabi doonto inaad wax barato, la kulanto asxaabta, aadna barato sida nidaamka magangelyadu u shaqeeyo.
- Xarumaha soo dhowaynta waxay shaqaaleysiiyaan **shaqaale/macalimiin** ka caawiya wiilasha/gabdhaha in la nidaamiyo, la maamulo iyo in lala socdo noloshooda bulshada iyo horumarkooda shakhsi ahaaneed.
- **3. Dhexdhexaadiye aad isku dhaqan tihiin** waa qof yaqaan afkaaga iyo dhaqankaaga. Midani waxa ay kaa caawin kartaa in aad fahanto waxa dhacaya ayna kuu sheegto waxa aad u baahan karto.
- **Masuul tabaruc ah**: Haddii aad ku sugan tahay Talyaaniga adigoo uusan kula joogin waalidkaa, ama qof weyn oo mas'uul ah, Maxkamadda Caruurta waxay kuu xilsaari doontaa qof weyn sida ugu dhakhsaha badan si uu u noqdo masuulkaaga, si uu kaaga caawiyo inaad samayso doorashada ugu fiican waqti xaadirkan iyo mustaqbalka iyo inuu kuu matalo si sharci ah.
- **Qof takhasus u leh Cilmi-nafsiga** waa xirfadle kaa caawin kara inaad hesho ereyada aad ku fahanto waxa aad ka dareemayso wadnahaaga iyo jidhkaaga iyo waxa aad ku haysto madaxaaga.
- **Dugsi** waa meesha aad ka bilaabi karto barashada talyaaniga, aad ku baran karto maadooyinka guud kadibna aad go'aansato inaad sii wadato waxbarashadaada ama tababarkaaga shaqo. Halkani waa meesha aad kula kulmi karto asxaabta oo aad ku baran karto sida bulshada Talyaanigu u shaqeyso.
- **Dadka dhaqangaliya sharciga iyo amarada**, oo ay ku jiraan Booliska iyo Carabinieri, ayaa mas'uul ka ah la socodka iyo dammaanad qaadka amniga bulshada iyo ixtiraamka xeerarka madaniga ah. Waxay wax ka qabtaan sharcigaada Talyaaniga, soo saarista ama cusbooneysiinta sharcigaaga degenaanshaha.
- **Xafiiska Adeegga Bulshada**: waa xafiis dadweyne, oo ay ka shaqeeyaan shaqaale bulsho, mas'uul ka ah hagidda iyo tilmaan siinta, adiga, mas'uulkaaga iyo xarunta soo dhowaynta, horumarka aad ka samaynayso Talyaaniga.
- **Maxkamada caruurta**: Hay'ad dadweyne si ay ula socoto unay hubiso in doorasho kasta iyo go'aan kasta oo adiga khuseeya ay mar walba ku jiraan dantaada.

# OGOW XUQUUQDAADA

Save the Children

## 1. HADDII AAD KA YAR TAHAY 18 SANO WAXAAD TAHAY QOF AAN QAAN GAARIN

- Waxaad xaq u leedahay inaad ku noolaato oona lagugu ilaaliyo Talyaaniga.
- Waxaad xaq u leedahay inaan lagu tarxiilin ama lagugu celin wadankaaga adigoon raali ka ahayn.
- Waxaad xaq u leedahay inaad muujiso naftaada, in lagu maqlo oo aad ku lug yeelato go'aan kasta oo adiga ku saamaynaya.
- Waxaad xaq u leedahay inaad hesho ogolaansho ilmo ama qoys, dukumeenti muhiim ah oo kuu ogolaanaya inaad si sharci ah u degto Talyaaniga oo aad ku isticmaasho xuquuqdaada maadaama aad tahay ilmo yar.
- Haddii aad safrayso adigoo aysan kula soconin waalid ama xubnaha qoyska, waxaad xaq u leedahay inaad hesho mas'uul tabaruc ah oo laguu xilsaaray si uu kaaga taageero horumarkaaga gudaha Talyaaniga, inuu kaa caawiyo inaad samayso doorashooyinkaaga waqti xaadirkaas iyo mustaqbalka.
- Waxaad xaq u leedahay inaad ku noolaato meel nabdoon iyo in lagugu wareejiyo goob daryeel oo ay ku nool yihiin caruur kale, halkaas oo aad seexan karto, ku nasan karto, wax ka cuni karto, lagugu xanaanayn karo haddii aad jirran tahay, aad ka heli karo sharci degenaansho, aad iskuul ka aaddo karto oodna fahmi karto sida loo sii wado waxbarashadaada iyo/ama aad kaga shaqatsan karto Talyaaniga.
- Haddii aad ka weyn tahay 16 sano, waxaa laguu wareejin karaa xarun daryeel oo ay dadka waaweyn sidoo kale ku nool yihiin: maadaama aad tahay ilmo yar xaquuqahaaga waa in xaalad kasta la ixtiraamaa.
- Haddii aad la safraysid xubin qoyska ka mid ah, waxaad xaq u leedahay in laguu raro meel qoys oo gaar ah oo aad bilowdo barnaamij kaa caawin doona inaad dareento soo dhawayn iyo daboolo baahiyahaaga iyadoo loo eegayo da'daada.
- Waxaad xaq u leedahay inaad la noolaato qoyskaaga ama inaad si joogto ah ula xidhiidho. Haddii mid ama labadaada waalid, walaalkaa ama walaashaa, ama xubnaha kale ee qoyskaaga ay ku nool yihiin Talyaaniga ama Yurub, la socodsii shaqaalaha xarunta soo-dhowaynta, maadaama laga yaabo inaad hesho caawimo si aad si nabdoon dib ugula midowdid ama joogteynta xiriirka aad la samaynayso, haddii aad rabto inaad sidaas samayso.



## 2. SIDEE AYAA XOGTAADA SHAKHSI AHAANEED SI RASMI AH LAGUUGU DIIWAAN GELIN KARAA?

Faahfaahinta shakhsi ahaaneed waa magacaaga, magac awowgaa, meesha aad ku dhalatay iyo taariikhda dhalashada.

Sharciga Talyaaniga iyo Yurub wuxuu dhigayaa in dhammaan dadka ka imaanaya wadamada aan Yurubta ahayn waa in la diwaangeliyaan marka ay soo galaan Yurub. Ha ka welwelin, tani waa nidaam caadi ah.

- Marka booliisku ku weydiiyo magacaaga, magaca awowgaa, taariikhdaada dhalashada iyo wadanka aad u dhalatay, si cad u sheeg oo hubi in wax walba si sax ah loo higaadiyay.
- Haddii aad haysato dukumeenti, ha ka baqin inaad tusto. Waa mid waxtar leh.
- Haddii aad wada joogtaan qof qaraabo ah, caddee waxa aad isku tihiin.
- Si wada jir ah xogtaada, booliisku waxay sawir ka qaadi doonaan wejigaaga waxayna sidoo kale kaa qaadi doonaa farahaaga waxaana la gelin doonaa nidaamka.
- Xogtaada gaarka ah waxaa si rasmi ah u diiwaan gashan doona Dawladda Talyaaniga waxayna faa'iido u yeelan doontaa bilawga inaad horumar ka samayso Talyaaniga.
- Haddii aad ka yar tahay 18, waxaad xaq u leedahay inaad magangelyo caalami ah ka codsato waddan kasta oo Yurub ah, xitaa haddii booliisku kaa qaaday farahaaga markii ugu horreysay ee aad soo gashay Talyaaniga.




## 3. SIDEED KU CADDAYN KARTAA DA'DAADA?

- Haddii aad u malaynayso in khalad la sameeyay markii la qorayay xogtaada, waxa aad xaq u leedahay in aad isla markiiba soo sheegto tan.
- Waxaa muhiim ah in la ogaado in sida uu dhigayo sharciga Talyaanigu ay dembi tahay in been laga sheegto magac, magaca awoowga, taariikhda dhalashada iyo wadanka aad u dhalatay. Tusida dukumentiyo been abuur ah waa dembi waana lagu soo sheegi karaa.
- Haddii laguu diiwaan galiyay inaad tahay qof weyn (18 sano jir ama ka weyn), sida ugu fudud uguna amaansan ee lagu caddeeyo da'daada waa inaad tusto dukumeenti aqoonsi (baasaboor, kaarka aqoonsiga) maamulka dadweynaha.
- Haddii aadan u maleyneynin inay adiga iyo qoyskaaga idin galinaynin khataro, waxaad heli kartaa caawimo la xiriirida maamulka qunsuliyada ee dalkaaga si aad u hesho dukumeenti cadeynaya da'daada.
- Haddii aadan awoodin inaad tusto aqoonsiga iyo maamulka dadweynaha ama xarunta soo-dhowaynta, ka dib markay ku waydiiyaan faahfaahintaada shakhsi ahaaneed iyo markay ku dhagaysanayaan, kaama dhigayso inaad tahay qof aan qaan-gaarin, waxay sababi kartaa in qiimayn lagu sameeyo da'daada. Inta lagu jiro habraacan waxaad la kulmi kartaa shaqaale bulsho, dhakhtar, iyo qof ku takhasusay cilmi-nafsiga. Dhammaan waraysiyada iyo latalinta inta lagu jiro habraacan, waxaad xaq u leedahay in ay ku weheliyaan dhexdhexaadiye luuqad ahaan afkaada ku hadla.

## 4. MAXAA DHACAYA MARKAAD 18 JIRSATO?

- Markaad 18 jirsato waxaad sii wadan kartaa inaad si sharci ah ku joogto Talyaaniga oo aad si nabdoon u raacdo hadafkaaga noolaleed.
- Kahor intaadan gaarin 18, ogow oo kala hadal mas'uulkaaga iyo shaqaalaha xarunta soo dhaweynta ee aad ku nooshahay waxaad u baahan tahay inaad sameyso si aad u sii wado horumarka aad ka gaarto Talyaaniga.
- Ogoow nooca dukumeentiga aad haysan karto ka dib da'da 18 iyo habraacyada aad u baahan tahay inaad raacdo.
- Weydiiso macluumaad ku saabsan meesha aad ku noolaan karto iyo sida loo sii wado hanaanka ka sii mid ahaanshaha marka aad gaarto 18 jir. Weydii taageerada maamul ee socda, tusaale ahaan suurtagalnimada in lagu taageero ilaa da'da 21 si loo sii wado waxbarashada iyo/ama tababarka si aad u noqoto qof iskiis u shaqeysta.

## 5. MAXAAD SAMAYN KARTAA HADDII AAD DAREENTO KHATAR IYO CABSI?

- Doonistaada, badbaadadaada iyo ilaalintaadu waa mid aad muhiim u ah.
- Waxaad xaq u leedahay inaad caawimo waydiisato. Isku day inaad sharaxdo waxa laga yaabaa in cabsidaada la dhagaysto.
- Ka gudubka xudduudaha u dhexeeya wadamada Yurub fasax la'aan waxay noloshaada gelin kartaa khatar weyn. Waxaa laga yaabaa inaad la kulanto khataro badan, oo ay ku jiraan xadgudub iyo/ama rabshad.
- Ka digtoonow inaad ku kalsoonaato qof kasta oo kuu sheega in tani ay sahlan tahay lana samayn karo iyada oo aan wax dhibaato ah la marin.
- Ku noolaanshaha wadooyinka waxay ku gelinaysaa khatar waxaana laga yaabaa inaad la kulanto dad doonaya inay ka faa'iidaystaan xaaladdaada nugul.
- Haddii lagugu khiyaaneeyey inaad Talyaaniga imaato, haddii halkan laguu keenay adiga oo aan raali ka ahayn, haddii adiga ama qoyskaaga loo hanjabay oo aad khatar dareemayso, haddii qof ku xukumo ama uu kugu qasbo inaad samayso wax aadan raali ka ahayn, haddii qof uu rabaa inuu ku geeyo wadan kale oo Yurub ah laakiin adiga aadan rabin, iyo haddii aad baqeyso, waxaad xaq u leedahay inaad codsato caawimo si aad u hesho gargaar iyo magangelyo.
- Haddii laguu geystay xadgudub ama rabshad ama haddii aadan si buuxda u fahmin waxa dhacay laakiin aadan jeclayn xaaladaada, waxaad xaq u leedahay inaad codsato caawimo aadna hesho caawimo iyo magangelyo.
- Haddii aad ku nooshahay xarun, weydiiso shaqaalaha xarunta meesha aad ku nooshahay ama mas'uulkaaga si uu kuu caawiyo.
- Haddii aad ku nooshaha wadada, weydiiso booliiska caawimaad. Way ku caawin karaan.
- **Haddii aad ka shakido waco Save the Children.**